Somali | Soomaali

Nooca 1.0

Febraayo 2023

# Mustawayaasha Badbaadada Ilmaha ee Victoria

## Tilmaame/hage luuqad fasiix ah lagu qoray

COMMISSION FOR CHILDREN AND YOUNG PEOPLE

# Waa maxay Heerarka Badbaadada Ilmaha?

- Heerarka Badbaadada Carruurta (Heerarka) waxay ka bilowdeen gobolka Victoria bishii Janaayo ee sanadkii 2016.
- Heerarkan ama nidaamyadan ayaa ka caawiya carruurta inay ka badbaadaan xadgudubka iyo waxyeelada.
- Waxaa jira 11 Heer oo Badbaadada Carruurta.
- Ururada la shaqeeya carruurt[1] waa *waajib* inay u hogaansamaan mustawahayaasha. *In loo hogaansamo* macneheedu waa in ururkaagu uu dejistay qorshe muujinaya inaad[2] raacdo aadna soo buuxisay mustawa kasta.

*Dukumiintigani waa mid kooban oo ku saabsan mustawayaasha Badbaadada Ilmaha. Wuxuu ka kooban yahay erayo iyo sawiro ay fududahay in la fahmo kuwaas oo ka caawinaya in la sharaxo Heerarka. Kuma jirto eraybixinta Heerarka oo dhameystiran ama dhammaan waxyaabaha loo baahan yahay inaad samayso si aad ugu hogaansanaato. Waxaad ka akhrin kartaa qormada Heerarka oo dhameystiran iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loogu hoggaansami karo websaayt keena.*



1 "Carruur" waxaa loola jeedaa dadka ka yar 18 sano.

2 Waxaan sidoo kale isticmaalnaa ereyga "kaaga" marka aan ka hadlayno "ururkaaga".

## Heerka Badbaadada Ilmaha 1







**Ururadu waxay xaqiijiyaan in carruurta Aborijinoolka ah ay dhaqan-ahaan u dareemaan badbaado. Waxay ixtiraamaan oo ay qiimeeyaan aqoonsiga iyo khibradaha cunig kasta.**

Ururkaaga iyo shaqaalahaaga waxaa waajib ku ah inay:

- soo dhaweeyaan dadka Aborijinoolka[3], dhaqankooda, iyo xuquuqdooda
- fahmaan sida tani ay uga caawinayso carruurta Aborijinoolka ah inay dareemaan ammaan iyo caafimaad
- diidaan cunsuriyadda ayna dejistaan shuruuc iyo ficillo looga falcelinayo cunsuriyadda
- ka caawiyaan carruurta Aborijinoolka ah sdii ay ku muujin lahaayeen aqoonsiyadooda kala duwan, caadooyinkooda, waxyaabaha ay aaminsan yihiin, iyo luqadahooda
- ka caawiyaan carruurta Aborijinaalka ah iyo qoysaskooda sidii ay qeyb uga noqon lahaayeen ururkaaga
- hubiyaan inay dhaqan-ahaan dareemayaan amaan
- dejistaan shuruuc iyo nidaamyo muujinaya inaad samaysay waxyaabahaan.

3 Waxaan u isticmaalnaa ereyga 'Aborijinool' si aan uga hadalno dadka Aborijinaalka iyo Torres Strait Islander ah.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 2




Hogaamiyayaasha ururka waxa ay diirada saaraan sidii ay ku xaqiijin lahaayeen amniga iyo badqabka carruurta. Ururada waxaa u degan nidaamyo lagu heli karo, loogana hortagi karo, laguna joojin karo khataraha xadgudubka ama waxyeellada loo geysto ilmaha.

Waa waajib in ururkaaga uu:

- dadweynaha u ballan qaado inay ka **go'an tahay sidii lagu** xaqiijin lahaa badbaadada carruurta. Tani micnaheedu waxay tahay inaad u sheegto bulshada in badbaadada carruurtu ay ururkaaga muhiimad u leedahay
- **leeyahay sharciyo loogu talagalay Badbaadada iyo Badqabka** Ilmaha. Kani waa dukumiinti sharaxaya sida uu ururkaagu ku hubiyo in caruurtu ay xaalad amni oo wanaagsan ku sugan yihiin
- xaqiijiyaa in qof kasta oo ka tirsan ururka uu ku dadaalo badbaadada carruurta
- heysto qoraal ah **Xeerka Anshaxa** shaqaalaha iyo mutadawiciinta. Kani waa dukumiinti u sharaxaya shaqaalaha sida loo baahan yahay inay u dhaqmaan marka ay carruurta la howlgalayaan iyo waxa aan la ogolayn
- diiwaangeliyaa waxyaabaha ku saabsan sida aad ku heli karto, uga fogaan karto, isla mar ahaantaasna aad ku joojin karto khataraha ay la kulmi karaan carruurta
- hubi in shaqaaluhu fahmaan sida loo wadaago macluumaadka loona xafido diiwaanada ku saabsan badbaadada carruurta.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 3




Carruurtu waa inay ogyihiin in xuquuqdooda, si dhab loo tixgeliyo, ayna qeyb ka ahaadaan go'aamada iyaga saameeya.

Waa waajib in ururkaaga uu:

- u sheego carruurta xuquuqda ay u leeyihiin:
  - amaanka
  - macluumaadka
  - inay qeyb ka ahaadaan go'aannada iyaga ku saabsan
- inay fahmaan laguna dhiirigeliyo muhiimada ay saaxiibtinimada leedahay. Tani waxay ka caawinaysaa carruurta inay dareemaan ammaan
- in caruurtu la siiyo barnaamijyo iyo macluumaad ku saabsan sida looga hortago xadgudubka galmada
- in la hubiyo in shaqaalaha iyo mutadawiciinta ay:
  - aqoonsan karaan calaamadaha xadgudubka iyo dhibaatooyinka carruurta loo geysto
  - ka caawiyaan carruurta inay si xor ah u hadlaan ayna ka hadli karaan waxyaabaha ay welwelka ku dhalinaya
- ka caawiyaan carruurta inay si firfircooni leh qeyb uga ahaadaan ururkaaga
- ka falceliyaan waxay carruurta u sheegaan si ay u dareemaan ammaan uuna usii jiro rabitaankooda ku aadan inay qeyb ka ahaadaan ururkaaga.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 4



**Ururadu waxay u sheegaan qoysaska iyo bulshada sida ay uga ilaalinayaan carruurta xadgudubka iyo waxyeelada. Waxay ku dhiirigeliyaan inay ku dadaalaan sidii lagu xaqiijin lahaa in carruurta laga ilaaliyo xadgudubka iyo waxyeellada.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- ka caawiyo qoysaska inay ka qayb qaataan go'aamada saameeynaya ilmahooda
- uu u sheego qoysaska iyo bulshada sida ururkaagu uga ilaaliyo carruurta xadgudubka iyo waxyeelada
- hubiyo in qoysaska iyo bulshadu ay si fudud u heli karaan ayna u fahmi karaan macluumaadkan
- hubiyo in qoysaska iyo bulshooyinka ay ra'yigooda ku darsan karaan sharciyada iyo dhaqamada ururkaaga
- u sheego qoysaska, daryeelayaasha, iyo bulshada wixii ku saabsan ururkaaga iyo sida uu u shaqeeyo.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 5



**Ururadu waxay fahmsan yihiin in carruurtu ay kala duwan yihiin. Waxay tixgeliyaan shakhsiga baahidiisa carruureed si loo siiyo daryeelka iyo taageerada ay u baahan yihiin.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- fahansan yahay inay ilmuhu kala duwan yihiin iyo in carruurta qaar laga yaabo inay u baahdaan taageero dheeraad ah
- caawiyaa uuna tixgeliyaa baahiyaha carruurta:
  - naafada ah
  - ka soo jeeda dhaqamada kale
  - ku hadasha luuqadaha kale
  - aanan ku noolaan karin guriga
  - lesbiyaanka, khaniisiinta, rag iyo dumarba u galmooda, labeebka ah, aan isu aqoonsaneyn inay rag iyo dumarba midkood yihiin, lab iyo dheddig kala duwan, ama labeebnimo ku dhashay
- hubiyaa in carruurtu ay si fudud u heli karaan macluumaadka iyo caawinta ay u baahan yihiin. Tani waa inay noqotaa mid dhaqan ahaan badbaado leh oo si sahlan loo fahmi karo
- hubiyaa inay carruurta u fududahay inay cabashooyin sameyn karaan ayna fahamsan yihiin nidaamkaas
- tixgeliya baahiyaha ay leeyihiin carruurta Aborijinoolka ah ayna hubiyaan inay had iyo jeer dhaqan-ahaan u dareemayaan amni.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 6



**Ururadu waxay hubiyaan in dadka la shaqeeya carruurta ay yihiin dad ku habboon howlahaas. Shaqaalaha waa la taageeraa wayna yaqaanaan waxa loo baahan yahay in la sameeyo si carruurta looga ilaaliyo xadgudubka iyo waxyeellada.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- diiradda saara badbaadada iyo samaqabka ubadka marka la shaqaaleysiinayo shaqaale cusub iyo mutadawiciin. Tani waxaa loo sameyn karaa qaab xayaysiis ah, in la wareysto dadka aqoonta u leh dadkaas la shaqaaleysiinayo, iyo baaritaanada la sameeyo, inta aysan shaqada bilaabin kahor
- hubiyaa in shaqaalaha iyo mutadawiciinta si sax ah loo baaray taariikhdoodii hore
- Hubi in shaqaalaha cusub ay yaqaanaan waxa loo baahan yahay inay sameeyaan si ay carruurta uga badbaadiyaan xadgudubka iyo waxyeellada. Tan waxaa ka mid ah:
  - inay wax kasta si fiican u diiwaangeliyaan
  - inay yaqaanaan goorta loo baahan yahay in la wadaago macluumaadka
  - inay yaqaanaan goorta iyo sida wax loo soo sheego
- hubi in maamuleyaasha ay ka caawiyaan shaqaalaha inay diiradda saaraan badbaadada carruurta.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 7



**Nidaamyada loo maro cabashooyinka iyo walaacyada ayaa diiradda saaraya ilmaha**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- leeyahay sharciyo khuseeya cabashooyinka. Sharciyadaas waa inay:
  - ahaadaan kuwo si sahlan loo heli karo loona akhrin karo
  - ahaadaan kuwo diirrada saaraya ilmaha
  - sharax:
    - waxa maamulayaasha, shaqaalaha, iyo mutadawaciinta (volunteers) ay tahay inay sameeyaan
    - sida loo maareeyo cabashooyinka kala duwan
    - waxa loo baahan yahay in la sameeyo haddii sharciyada ama Xeerka Anshaxa aan la raacin
    - marka loo baahan yahay in ururkaaga uu warbixin u gudbiyo masuuliyiinta, sida booliiska
- hubi in carruurta, qoysaska, shaqaalaha, iyo tabaruceyaasha ay dhammaan fahmaan sida ururkaagu uu u maareeyo cabashooyinka
- u xali cabashooyinka si munaasab ah oo dhaqan ahaana badbaado leh
- si dhab ah u qaado cabashooyinka oo dhan isla markaasna si degdeg ah wax uga qabo
- sameyso shuruuc iyo habraacyo ku saabsan:
  - sida cabashooyinka loogu soo gudbiyo ururkaaga
  - cida ay tahay in cabashada loo soo gudbiyo
  - goorta ay tahay in cabasho la soo gudbiyo
  - sida loogu wargaliyo cabashooyinka, loolana shaqeeyo, booliiska iyo maamulada kale
- sida loogu hogaansamo dhamaan sharciyada ku saabsan wax-soo-sheegista, sirta, iyo shaqada.

## Heerka Badbaadada Carruurta 8



**Ururadu waxay siiyaan shaqaalaha waxbarasho iyo tababar si ay carruurta uga badbaadiyaan xadgudubka iyo waxyeellada.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- raaco xeerka Badqabka iyo Badbaadada Carruurta ee u degan ururka
- aqoonsado calaamadaha xadgudubka iyo dhibaatooyinka lagula kaco ubadka. Tan waxaa ka mid ah xadgudubka iyo waxyeellada ay geystaan carruurta kale
- ka jawaab arrimaha la xiriira badbaadada iyo samaqabka ubadka
- caawin shaqaalaha kale marka ay la tacaalayaan arrimaha la xiriira badbaadada carruurta
- faham sida carruurta loo dareensiiyo inay dhaqaan-ahaan ku sugan yihiin jawi nabdoon.

## Mustawaha Badbaadada Carruurta 9



**Ururadu waxay hubiyaan in caruurtu ay nabad qabaan marka ay isticmaalayaan adeegyadooda, goobahooda, iyo waxqabadyadooda. Tan waxaa ku jirta marka ay carruurta isticmaalayaan internet ka.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- xaqiijiyo in shaqaalaha iyo mutadawiciinta ay heli karaan ayna joojin karaan khataraha. Marka ay saas samaynayaan waxaa wali looga baahan yahay inay xaqdhowraan xuquuqda ay ilmaha u leeyihiin:
  - sirta (privacy)
  - macluumaadka
  - in saaxiib uu la joogo oo aysan dareemin kalinimo
  - inay wax bartaan
- hubi in shaqaalaha iyo tabarucayaasha ay fahansan yihiin badbaadada onlaynka. Markay internetka isticmaalayaan, waa inay la kulmaan ururkaaga
  - Xeerkiisa Anshaxa
  - Shuruucda ku aadan Badbaadada iyo Badqabka Ilmaha
- qor **qorshayaasha** lagu maaraynayo khatarta. Kuwani waa qorshayaal ah sida aad u maareyn doonto khataraha ka iman kara goobahaaga, hawlahaaga, iyo deegaankaaga
- ku da'daal amniga carruurta marka ururkaagu isticmaalo xarumaha ama adeegyada ururada kale.

## Heerka Badbaadada Ilmaha 10



**Ururadu waxay eegaan isla mar ahaantaasna ay hormariyaan siyaabaha ay carruurta uga badbaadiyaan xadgudubka iyo waxyeelada.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- sii wad hubinta iyo hormarinta waxa aad samayso si aad u ilaaliso badbaadada carruurta iyo dhalinyarada
- fiiri cabashooyinka, welwelka, iyo shilalka badbaadada si aad u ogaato sida ay wax u dhaceen. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad hormariso waxa aad samaynayso
- u sheeg shaqaalaha, tabaruceyaasha, bulshada, qoysaska, iyo carruurta wixii kuusoo baxay.

## Heerka Badbaadada Carruurta 11




**Ururadu waxay hayaan dukumiinti qoraal ah oo ku saabsan sida ay carruurta uga badbaadiyaan xadgudubka iyo waxyeelada.**

Waa waajib in ururkaaga uu:

- heysto shuruuc iyo habraacyo u qoran oo:
  - daboolaya dhammaan Heerarka Badbaadada Carruurta
  - uu yahay mid si sahlan lagu heli karo loona fahmi karo
- la **shaqeeyo daneeyayaasha** si aad u horumariso shuruucdaada iyo habraacyadaada. Kuwani waa dad dan ka leh ururkaaga. Tani waxay noqon kartaa:
  - shaqaalaha iyo tabarucayaasha
  - carruurta iyo xubnaha qoyska
  - ururada kale ee aad isla shaqeysaan
  - kooxaha bulshada ama xubnaha
- Eeg nadaamyada iyo habraacyada wanaagsan ee ururada kale
- hubi in madaxdaadu ay taageeraan sharciyada iyo habraacyada
- hubi in shaqaalaha iyo tabarucayaasha ay fahmaan ayna ku dhaqmaan shuruucda iyo nidaamyada.

## Halka aad ka heli karto caawimaad

Kuwa hirgalinaya Heerarka Badbaadada Ilmaha ayaa ku siin kara macluumaad kaa caawinaya inaad gaadho Heerarka.

Waxaad ka heli kartaa wixii ku saabsan kuwa hirgelinaya nidaamka Heerarka Badbaadada Ilmaha halkan.

Waxaad kala xiriiri kartaa Guddiga:

Taleefanka: 1300 782 978

Iimayl: contact@ccyp.vic.gov.au

Mareegta: www.ccyp.vic.gov.au

Interpreter

Haddii aad u baahan tahay turjubaan, fadlan kawac Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada 13 14 50. Usheeg inay kuu wacaan Guddiga Carruurta iyo Dhallinyarada oo uu lambarkoodu yahay 1300 782 978.

Guddidu waxay si xushmad leh u qirayaan uguna dabbaaldegayaan Milkiilayaasha Dhaqanka ee dhulalka Victoria oo dhan waxayna xushmad u hayaan Waayeelkooda, carruurtooda iyo dhallinyaradii hore, kuwa hadda jooga iyo kuwa mustaqbalka imaan doonaba.

© Guddiga Carruurta iyo Dhallinyarada 2023

Shaqadani waa xuquuqda daabacaada. Marka laga reebo isticmaal kasta ee ku hoos qeexan *Xuquuqda daabacaadda 1968*, qaybna dib looma soo saari karo hab-raac kasta iyada oo aan oggolaansho qoran laga helin Guddiga Carruurta iyo Dhallinyarada, Heerka 18, 570 Bourke Street, Melbourne 3000.

Guddigu waxa uu rabi lahaa in uu qiro ka qayb qaadashada ay enliven's Health Services Literary kaga qeybqaateen horumarinta nooca Luqada fasiixa ah ee ilahan ( www.enliven.org.au / healthliteracy@enliven.org.au ) bisha May 2022.
Sawirada waxaa sameeyay isla markaasna habeeyey enliven Victoria oo ay ku jirto adeegsiga Calaamadaha Isgaarsiinta Sawirka ©1981-2022 ee Tobii Dynavox. Dhammaan Xuquuqaha Waxay Ku Dhawrsan Yihiin Adduunka Oo Dhan. Waxaa la isticmaalay iyadoo ogolaansho la heysto. Boardmaker ® waa astaanta Tobii Dynavox. Dukumiintigan waa inaan laga iibin cid saddexaad. Sawirada waa inaan dib loo isticmaalin ogolaansho la'aan.

COMMISSION FOR CHILDREN AND YOUNG PEOPLE